

# Ogaysiiska la Kulanka ee Qoyska – Hablo-baaska

Gacaliye Qoys:

Ilmahaagu waxa dhici karta inuu ka qaaday hablo-baas Xarunta Head Start/ECEAP. Waa cudur fayras keeno oo taabashada lagu qaado oo finan leh.

**Waa maxay astaamuhu?** Xummad iyo finan cuncun leh kuwaasi oo dheecaan leh. Marka hore jidhka ayey ka soo baxaan kadibna wejiga. Qolof madow ayaa samaysanta maalin ama laba kadib marka finanka dheecaanka leh furmaan.

**Sidee ayuu ku faaftaa?** Si sahlan. Waxyaalaha ka yimaada sanko iyo cunaha iyo finanka dheecaanka leh ee qofka qaba cudurka.

**Goorma ayey astaamuhu bilaabmaan?** 2-3 toddobaad kadib la kulanto fayraska.

**Ma loo baahan yahay ilmaha in guriga lagu hayo?** Haa, ilaa **dhammaan** dhibcuhu ay qolofka leeyihiin (sida badan 7 maalmood) oo xummaduna go'day.

**Asbiriinka waa in laga dheeraado** – isticmaal daawada aan isbiriinka lahayn sida Tylenol.

Fadlan wargeli bixiyaha daryeelka caafimaadkaaga oo ogaysiis xarunta Head Start/ECEAP ee ilmahaaga haddii uu astaamahan yeesho.

Haddii adiga ama qof kale oo u dhaw ilmahaagu uu uur leeyahay, dhakhtarka qofkaas waa in sidoo kale la waco.

Shaqaalaha: \_\_\_\_\_ Taleefanka: \_\_\_\_\_

Xarunta: \_\_\_\_\_